


CONSUMER DIRECT CARE NETWORK WASHINGTON

# Maareynta Loo shaqeyaha **Hagaha Bilowga Degdegga ah**

**Shabakadda Daryeelka Macmiilka Tooska ah ee Washington (CDWA) waa Loo shaqeyaha Bixiyaasha Shaqsiga (IP). Waxaanu masuul ka nahay shaqooyinka maamulka shaqaalaysiinta IP-yada.**

Macaamiisha ama Wakiilmada La ogolaaday ayaa Maareynta Shaqaalaysiiyaasha IP-iyada. Maareynta Shaqaalaysiiyaha, masuuliyadaada waxaa ka mid ah shaqaalo qorista, shaqaalaysiinta iyo ballaminta IPs-yada. Hagaha degdega ah wuxuu bixinaya macluumaadka masuuliyaddahan. Faafaahinta dheeraadka ah mowduucayan iyo wax ka badan waxaa laga heli karaa Buug Gacmeedka Maareynta Shaqaalayaha ee ku jira websaydkeena: **www.ConsumerDirectWA.com/Resources**

## SHAQAALAYSIINTA IYO WAREYSASHADA IPs-yada

- Waxaad masuul ka tahay shaqaalaysiinta surtagalka ah ee IPs-yada.
- Waxaad isticmaali kartaa nidaamka Carina si aad u hesho IPs-yada. Carina.org/HomeCare-Options
- Waxaad la xiriiri kara CDWA wixii ah caawinta CDWA.
- Waa inad raacda sharciyada ku saabsan takoorka. IP-ga si gaar ma ula dhaqmid kartid sababtoo ah:
  - Isirkooda
  - Midabkooda
  - Diintooda
  - Wadanka ay ka soo jeedan
  - Da'da
  - Jinsiga
  - Dhaqanka Galmada
  - Naafanimada/curyaanimada
  - Heerka Guurka
  - Uur
- Tusaalooyinka su'aalaha **ma weydin kartid** marka aad wareysanaysi IPs-yada waxaa ka mid ah:
  - Imisa ayaad jirtaa?
  - Ma guursatay?
  - Abidkaa ma lagu xiray?
  - Kiinsadee aadaa?
  - Waa maxay isirkaaga?
  - Ma leedahay ama kiraysatay gurigaaga?
  - Wadankee ku dhalatay?
  - Ma leedahay wax carruur ah?
  - Ma leedahay curyaanimo ama xaalad caafimaad?
  - Waa maxay diintaada?

## SHAQAALAYSIINTA IPS-YADA

- Ka xaqiiji IP-yaada si aad u aragto haddii ay buuxiyeen dhammaan shuruudaha shaqaalaysiinta. Adiga ama qofka kuu xlisaaran si elektroonig ahaan ayaa u buuxin doonaan Qeybta 2 ee IPs-yada foomka I-9 adiga oo isticmaalaya DocuSign. Haddii aad u baahan caawin, fadlan la xiriir CDWA.
- Xusuusi IPs-yaada inaad buuxiso hanuunita shaqaalaysiinta CDWA haddii ku dabaqan tahay, Hanuuninta Iskaashiga Tababarka SEIU 775 & badqabka tababarka.
- Ma ballan kartid IP ilaa CDWA ay ku ogeysiiso adiga inay IP u caadi ku yahay inuu Shaqeyo.

20211005

*ku sii socon doonto bogga xiga* 

## JADWALAYNTA

- **Isku qorista shaqooyinka iyo saacadaha**
  - Waxaad masuul ka tahay wixii ah ku qorista IP sacaadaha iyo shaqooyinka.
  - Tani waxaa lagu sameeyn karaa gelista bogga web CDWA's DirectMyCare ama waxaa lala xiriiraya CDWA.
  - Haddii aad qabto oo kaliya hal IP, CDWA waxay si toos ah ugu qoraysa saacadaha iyo shaqooyinka IP-kaas ilaa Xadidka Toddobaadka Shaqada.
- **Sameeynta jadwalka**
  - Waxaad masuul ka tahay jadwalaynta IPs-yadaada.
  - CDWA masuul ka ma ahan jadwalaynta IPs-yada.
- **Xadidyada Toddobaadka Shaqada (WWL)**
  - WWL waa 40 saac toddobaadka shaqada haddii IP-ga uusan laheyn WWL joogto ah.
  - Toddobaadka shaqada waa Axad– Sabti.
  - IP wuxuu leeyahay WWL. IP ma gudbi karo xadidkan hadddi ay u shaqeynayan Macamiil ka badan adiga.
  - Ma codsan kartid kordhinta ku meel gaarka ah WWL. CDWA waa inay ansixisaa kordhinta.
- **IP U qalmista Socda**
  - Masuul ka timihid jadwalaynta IP -ga inuu shaqeeyo haddii aysan hadda u qalmin.
    - CDWA aya ku ogeysiin doontaa adiga iyo IP haddii IP u qalmin.
    - Haddii IP wuxuu shaqeya kadib markii la ogeysiiyo, waxay heli doonaan tallaabada saxda waxana laga yaaba inay joojiyaan.
- **Lacagta Bixinta Waqtiga Fasaxa (PTO)**
  - IPs-yada waxay u qalmaan PTO.
  - IP ayaa dooran karaa sida ay u isticmaalan PTO.
  - IP ayaa ku jadwalayn karaa PTO Adiga una soo gudbin doonaa PTO ilaa CDWA.
- **Fasaxa Maqnaanshaha**
  - IPs-yada ayaa u qalmi karaa maqnansha fasaxa xaaladdaha gaarka ah.
  - Fasaxa Maqnaanshaha waxay ka duwan tahay PTO.
  - IP waa inuu adiga kula soo xiriira oo isku xira taariikhada uu fasaxa ku jiro.
  - IP wuxuu ka codsaaya fasaxa maqnaanshaha CDWA.

## HANUUNTA IPS-YADA

- Waxaad masuul ka tahay wixii ah hanuuninta IPs-yada ee ku jira Qorshaha Daryeelkaaga.
- Waa inaad sidoo kale sharaxdaa wixii filashooyinka dheeraad ah ee IP-ga. Tusaalooyinka waxaa ku jira kara:
  - Iska bixinta kabaha marka aad gurigaaga galayso
  - Isticmaalka telefonka gacanta inta lagu jiro xiliga shaqada
  - Dhar la aqbali karo

## KORMEERISTA IPS-YADA

- **Jawaab celinta Shaqada**
  - Waxaad masuul ka tahay bixinta Jawaab celinta IP ee shaqadooda.
  - Jawaab celinta ayaa noqon karta labada mid wanaagsan oo waxtar leh haddii ay jiraan arrimo. Tababarista IP sida loo sameeyo waxa gaarka ah ayaa loo baahan karaa.
  - Waxaa lagu dhiiragelin karaa IPs-yada inay bixiyaan hadal iyo qoraalka jawaab celinta.
  - Waxay muhiim u tahay in dukumenti la geliyo marka arrimaha ay dhacan. Waxaa ku jira taariikhda, faafaahinta soo saarida iyo soo koobida wada shakeysiga IP.



*ku sii socon doonto bogga xiga*

## CAYRINTA IP-GA

- Waxaad dooran karta inay yeelanin IP sii wada in lagu siiyo adeega daryeelka.
- Waxaad masuul ka tahay ogeysiinta IPs-yadaada.
- Waa in isla markiiba aad ogeysiisa CDWA marka aad iska ceyriso IP.
- CDWA waxay rabtaa inay ogaato sababta aad u ceyrisay IP.
- CDWA oo kaliya shaqo joojin ku sameeyn karta IP. CDWA waxay go'aansan doontaa haddii IP u qalmo in shaqeyo Macaamiisha kale.

## ADEEGYADA KORMEERIDA

- **Saacadaha Adeegyada Bilaha**
  - Waxaad masuul ka ah inaysan soconin saacadaha adeegyadaada bilaha ah.
- **Qorshaha Labaad**
  - Waa inaad leedahay qorsho labaad haddii IP uusan awoodin inuu shaqeyo. Tusaale ahaan, IP wuxuu ku jira PTO ama fasax, waa uu jiran yahay ama awoodo inuu shaqeyo.
  - Waqtiga dheeraadka ah joogtada ma ahan qorsho labaad.
  - CDWA ma lahan barka laga helo IPs-yada.
  - Waxaad ka heli kartaa bixiyaal kale system-ka Carina.
    - Waxaad la xiriiri kara wixii ah caawin ah CDWA adiga oo isticmaalaya Carina.

## BADQANKA GOOBTA SHAQADA

- Waa inaad siisa IPs-yada goob shaqo badqab.
- **Haddii an IP u dhawacmo inta lagu jiro xiliga, waad inaad:**
  - Hubisa IP-ga inuu helo caawin caafimaad, haddii loo baahdo.
  - Haddii dhawaca u daran yahay iyo halis ku yahay nolosha, wac 911.
  - Hubi IP ama adiga, haddii IP u awoodin, wac CDWA si aad ugu sheegto dhawaca 877-532-8542.
- **Dhaqamada Wanaagsan ee Badqabka Guriga**
  - Walxaha afka leh (cirbidaha, iwm) waa in si wanaagsan loo duuga.
  - Wadooyinka inay nadiif yihiin oo ay laheyn halisyada lagu dhaco (filooyinka korontada waa badqab mana lahan isgooska marinka hoolka).
  - Dab damiyaha iyo tooshka ayaa la helaya.
  - Kala hadal waxaa dhacaya haddii u dab kaco. Ka hor xaaladda degdeg ah, la xiriir, lambarada aan-aheyn xaaladdaha degdega ah ee booliska iyo dabka maxaliga si aad u sheegto qofka nugul ee ku nool gurigaas.
  - Kala hadal wixii walacyo ah oo ku saabsan xawayanka ku jira gurigaaga.

## DHIBAATEYNTA, AFLAGAADA IYO TAKOORKA (HAD)

- Dhibaateynta, xadgudub galmo, aflaagada ama takoorka adiga laguu geysto ama qof qoyskaaga ah lagama mamnuuco.
- **Dabeecadaha la mamuuncay waxaa ka mid ah:**
  - **Dhaqanka aflagaada/Rabashada goobta shaqada:** Hadalka ama ficilada jirka kuwaas oo waxyeelo ama dhibaateeya qof ama hantidooda.
  - **Takoor:** Takoorka ka dhanka qof oo saleysan dabeecado walba kuwaas uu ilaaliyo sharciga.
  - **Dhibaateyn:** Hadal aan fiicnayn, muqaal, ama dhaqan muuqada oo abuura cabsi gelin, wareer, ama jawi aan degnayn kuwaas oo farageliya shaqo qabashada.
  - **Xadgdubka Galmada:** Dabeecada wareerka galmada ee aan la rabin lagu bartilmaamedsanayo shaqsiga (yada).
- Faafaahinta dheeraadka ah ee dabeedadahan la mamnuucay waxaa laga heli karaa Maareynta Buug gacmeedka Shaqaalayaha.
- Adiga ayaa masuul ka ah fahamka iyo ka ilaalinta IP-yada dabeecadahan.
- Waa masuuliyaddaa inaad siiso IP-ga goob shaqo oo badqab ah.
- IPs-yada waxaa lagu dhiiragelinaya inay soo sheegan dabeecada qaldan.



*ku sii socon doonto bogga xiga*

## QIYAANADA MEDICAID, WASAQADA IYO AFLAGAADA

**Adiga, IPs-yada iyo CDWA ayaa masuul ka ah dhammaan ka hortaga si xun u isticmaalida lacagaha Medicaid.**

- **Qeexitaanada:**
  - **Qiyaanada** waa ula kicid kas ah iyo si xun u fahmid u qof sameeyo (shaqsi am haya'ad) iyada oo la ogyahay in qiyaanada ay ka dhalan karto qaar ka mid ah faa'iidooyinka aan la ogolayn.
  - **Wasaqda** waa isticmaalista badan iy adeegyada sida qaladka ah ama dhaqamada kale, tooska ah ama tooska aheyn, natiijada waa lagama marmaan qarashaka Medicaid.
  - **Aflagaado** waxaa lagu qeexay sida dhaqamada bixiyaha kuwaas oo an si waafaqsanin oo leh dhawaq dhaqaale, ganacsi, shaqooyinka caafimaadka, iyo natiijada aan lagama marmaanka aheyn ee qarashaka si dib loogu celiyo barmaanijyadda Medicaid.
- **Tusaalada Qiyaanada:**
  - IP ka been abuurto waqtigooda waxaa ka mid ah waqti ka badan inta ay shaqeeyn.
  - Waaxaad culus saaraysa IP si aad kula qeybsataan lacag bixintooda.
  - Lacag kaga ma qaadi doono adeegyada lacagta bixiyey.

**Haddii aad aragto ama aad ka shakiso qiyaanada Medicaid, waad inaad soo sheegta sida ugu dhaqsiyaha badan. Waxaad ku soowargelin karta CDWA ama si toos ah Xafiiska Qareenka Guud ee Washington.**

  - **CDWA** – InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com ama 866-214-9899
  - **Xafiiska Qareenka Guud ee Washington** - MFCUreferrals@atg.wa.gov ama 306-586-8888

## QALABKA ILAALINTA GAARKA AH (PPE)

- **Gacmo gashiyada**
  - Waa inaad siisa gacmo gashi IPs-yada oo loogu talagalay shaqooyinka daryeelka gaarka ah ee gacmaha-furan.
  - Waxaad heli kartaa bishii 200 gacmo gashi faa'iidooyinka My Apple Health (Medicaid). Waxaa laga yabaa inaad awoodo inaad hesho wax badan haddii caafimaad ahaan lagama marmaan tahay.
  - Haddii aad leedahay caymiska Apple Health (Medicaid) daryeelka maamulan, waxaad la xiriir kartaa qorshahaaga caafimaadka ama dhakhtarkaaga si aad u dalbato gacmo gashiga ama https://www.hca.wa.gov/assets/billers-and-providers/13-010.pdf
  - **Haddii aad leedahay caymiska Apple Health taas oo aan loo marin daryeelka maamulan waxaa laga yaaba:**
    - Inaad wacdo qeybiyaha qalabka caafimaadka liiska qoran Maamulka Daryeelka Caafimaadka: https://www.hca.wa.gov/assets/billers-and-providers/ffs_providers_non_sterile_gloves.pdf; ama
    - Wac dhakhtarkaaga; ama
    - Wac Xarunta Adeega Caafimaad 1-800-562-3022. Lambarkan wuxuu yeela qeybta dambe ee kaarkaaga Adeegya Caafimaadka buluga. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helida gacmo gashiyada ee booqashada websaydka Maamulka Daryeelka Caafimaadka http://www.hca.wa.gov/medicaid/dme/Pages/default.aspx.
- **Codsiyada IP**
  - IPs-yada ayaa sidoo kale codsan karaa PPE iyaga oo buuxinaya foormka codsiga. https://www.dshs.wa.gov/sites/default/files/DDA/dda/documents/covid-19/20200612%20PPE%20Request%20IP.pdf



*ku sii socon doonto bogga xiga*

## MASUULIYADDA MACMIILKA (HADDII AY KU DABAQAN TAHAY)

- Qaar kamid Macaamiisha ayaa qabi kara Lacag isla bixinta Masuuliyadda Macmiilka ee bilaha.
- Cadada bilaha waxaa go'aamin doonaa Dhaqaalaha Shaqaalaha DSHS, ee mahan CDWA.
- La xiriir Dhaqaalaha Shaqaalaha haddii aad qabto su'aalo ku saabsan cadada.
- Waxaad bixinta doontaa lacagta Masuuliyadda Macmiilka bilaha CDWA. ma ahan IP.
- Haddii aad bixiso lacagta Masuuliyadda Macmiilkaaga, CDWA waxay bixin doontaa nuqulka Shuruudaha Masuuliyadda Macmiilka. Shuruudaha ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydkeena. www.ConsumerDirectWA.com/Resources/
- Waxaad masuul ka tahay dib u eegista Shuruudaha iyo weydiinta su'aalaha.
- Adeegyada Shaqaaleeyaha Macmiilkaaga Jiheysan (CDE) ayaa la joojin karaa haddii aan lacagta lagy bixinin Shuruudaha.

Waxaad codsan kartaa Maareynta Buug Gacmeedka Maareynta Shaqaalayaha adiga oo la xiriiraya InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com ama 866-214-9899.

## LA XIRIIR CDWA

**Ma qabto su'aalo loogu talagalay CDWA?**
**Iimayl noogu soo dir InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com ama Wac 866.214.9899**

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Arabic<br>العربية | 866.215.6909 | Cantonese<br>粵語 | 866.216.3065 | Khmer<br>អក្សរខ្មែរ | 866.215.7610 | Korean<br>한국어 | 866.215.6907 |
| Lao<br>ພາສາລາວ | 866.215.8044 | Mandarin<br>普通话 | 866.216.1752 | Russian<br>русский | 866.215.4069 | Somali<br>Soomaali | 866.215.5669 |
| Spanish<br>Español | 866.215.0131 | Tagalog<br>Tagalog | 866.215.3817 | Ukrainian<br>Українська | 866.215.4674 | Vietnamese<br>Tiếng Việt | 866.215.2762 |

**Ma aragtid luuqada aad doorbidayso?**

Iimayl noogu soo dir InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com ama naga soo wac CDWA 866.214.9899 wakiil oo uu la socdo turjumaan ku soo wici doona si kor loogu qaado waayo aragnimada wicitankaaga. Si aad noogula soo xiriirto TTY, wac 877.398.7969.

**Ka hel wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan CDE ama CDWA**
**www.ConsumerDirectWA.com**

CONSUMER DIRECT CARE NETWORK WASHINGTON



NOLOL WALBA. DAQIIQAD WALBA. MAALIN WALBA.